

Tix: GSH/03/13
Kalfadhiga: 3aad
Kulankiisa 7aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

28^{kii} Seteembar 2013



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR BAARLAMAANI AH

**GO'AAN GOLAHA SHACABKA OO LA XIRIIRA
WEERARKII 21^{KII} SETEEMBAR, 2013 LOO
GEYSTAY SEYLADDA WESTGATE, NAIROBI**



Muqdisho, 28^{dii} Seteembar 2013

| | |
|-----------------------------------------------|-----------|
| BARLAMAANKA FEDERAALKA S O O M A A L I Y A | |
| XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GELID / RECEIVED | |
| TAR: | 28/9/2013 |
| TIX: | 280 |
| SIXIX: | Shuute |

GOLAHA SHACABKA:

Markuu arkay: mada'a aasaasiga ah lagu dhisay Dastuurka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan Quraanka Kariimka iyo Sunnada Nabigeena Muxammad (NNKHA) isla markaana uu yahay mid ilaalinaya maqaasidka Shareecada iyo Cadaaladda ijtimaaciga ah;

Markuu arkay: Qodobka 10 (1) ee Dastuurka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu qabo in karaamada aadamuhu ay tahay deeq Ilaahey Subxaanahu wa tacaalaa ku mannastay qof kasta oo Bani'aadan ah waana aasaaska Xuquuqda aadamahu oo idil;

Markuu arkay: sida ku cad Qodobada 13 iyo 15 ee Dastuurka oo qiraaya in qof waliba xaq u leeyahay nolo, xuriyad iyo nabadgelyada qofnimadiisa, isla xuquuqdaas oo ku xusan Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadamaha kaasoo noqotay Baaq Caalami ah oo lagu dhaqaayo dhaamman aadanaha;

Markuu arkay: in haddii la waayo nabadgelyo iyo badbaado aanay suuragal ahayn in la hanto horumarka bulsho iyo mid dhaqaale toona:

Isaga oo ay saameysay: Tiiraanyada uu sababay weerarkii lagu qaaday dadka aan waxba galabsan ee ku sugnaa Seyladda Ganacsiga Westgate ee Nairobi 21kii September 2013, weerar kaasoo dhaliyay dhimasho iyo dhaawac soo gaaray dad badan oo hanti bandanna ku burburtay.

Waxaa naga go'an: in aanu si dhab ah dhidibada ugu aasno ku dhaqanka Qur'aanka Kariimka ah oo ina faraya jaceylka, biniaadmanimada iyo naxariista.

Hadaba: Golaha wuxuu go'aansaday Arrimaha soo socda:

1. **Wuxuu cambaareynayaa:** weerarka argagixnimada ahaa loo geestay dad aan waxba galabsan, wuxuu si niyadsami ah u tacsiiyeynayaa qoysaskii ehelladooda dhacdadanku geeriyooday kuwa ku dhaawacmayna waxaan u rajeynaynaa bogsiima deg deg ah, shacbiga iyo Dawladda Kenya inay dhaqsi ugu soo kabsadaan xaaladda murugada iiyo tiiraanyada leh ee dalkooda hadda ku sugan yahay.
2. **Wuxuu hoosta ka xariiqay:** in falka gurraacan ee argagixnimada laga maarmaan ka dhigaya in loo baahan yahay in dawladda Gobolka wadajir isaga kaashadaan sugidda nabad waarta.

3. **Wuxuu cusbooneysiinayaa:** go'aankiisa uu ku tibaaxayo in ay ka go'an tahay ixtiraamka iyo ku dhaqanka mabaadii'da, heshiisyada iyo ballamada Caalamiga ah ee mamnuucaya adeegsiga cunfiga iyo dagaal wajiguu doonaba ha lahaadee oo lagula kacayo dad rayid aan hubaysneen oo waxba galabsan.
4. **Iyadoo la raacayo mabaadii'da Islaamka iyo Dastuurkeena:** wuxuu ku dadyowga oo dhan ku boorinayaa in ay sugaan cadaaladda ijtimaaciga ah, ilaaliyaan nolosha iyo xuriyadda ayna ka fogaadaan cunfiga lagula kaco rayidka aan waxba galabsan.
5. **Wuxuu Xukuumadeena:** ugu baaqayaa inay dalalka jaarka la gasho heshiisyo lagu xoojinaayo xog-isweydaarsiga sugidda ammaanka, oo ay ka mid yihiin xogta la xiriirta argagixisada, sirdoonka dembiyada culus, ilaalo wadajir ah oo lagu sugaayo ammaanka xuduudaha, in la sameeyo qalab isgaarsiin oo wadaag ah iyo hub lagu maareeyo Arrimaha qaxootiga.

Ugu dambeyntii: waxaa Xogahayaha Guud ee Golaha Shacabka la farayaa in uu Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya u soo diyaariyo qoraalka rasmiga ah ee qaraarkan loogu gudbinaayo Guddoomiyaha Golaha Qaranka ee Jumhuuriyadda Kenya.